Taariikhda Abiibakar Sidiiq
Qaybta Kowaad

الحمد لله رب العالمين والصلاة والسلام على أشرف الأنبياء والمرسلين نبينا محمد وعلى آله وصحبه أجمعين

Mahad oo dhan Alaah iska leh Rabiga caalam ka abuurey Allaha ha amaano nabigeena sharafta badnaay anbiyada kan ugu fadliga badan&anbiyada lasoo direy dhamaantood

Abtirsigiisa & Nasabkiisa

>Abiibakar sidiiq رضي الله waxaa magaciisa la oran jirey **Cabdulaahi Ibnu Cismaan Ibnu Caamir ibnu cumar ibnu kacab ibnu sacad ibu tayim ibnu murra ibnu kacab ibnu Lu"ayi.**
Abiibakar aabihiisa waxaa la oran jirey **Cismaan** waxaana loogu naaneysi jirey **Abii Quxaafa** Abiibakar hooyadiisa magacadeeda waxaa la oran jirey **Salma bintu sakhar** waxaana lagu naaneysi (Kunyo) jirey **Ummul Khayr** waxayna ilmo adeer ahaayeen abiibakar aabihiis .Abiibkar wuxuu ka dhashay (Laf) jilib ahaan **reer Banii Taym**.

Xaasaskiisa & caruurtiisa

Abiibakar sidiiq رضي الله wuxuu ku dhashay magaalada makka sanadkii **caamul fiil** oo ku aadan qiyaasta 53sano (konton & sadex sano) kahor wuxuu 2sano iyo bilooyin ka yaryahay { رسُول الله صلى الله عليه وسلم } rasuulkeena s.c.w .

>Abiibakar رضي الله waxa uu guursadey 4 haween ah(Afar xaas) Magacyadooda waxay kala yihiin Sidaan hoos ku xusan :

> **Quteyla Bintu Cabdul Cuzaa :** waxay u dhashay Abiibakar **Cabdulaahi** & **Asmaa** isku bahyihiin (iskubah waxaa loo jeeda in caruurta isku aabe yihiin laakiin hooyooyin kala duwan kala dhalaan

> **Ummu Rawmaan bintu Caamir Al - Kunaaniya :** waxay u dhashay Abiibakar **Cabdiraxmaan** & **Caisha** marka waxaad arkeysaa umunaa caisha (Hooyadeena Caisha) inay cabdiraxmaan isku bahyihiin (iskubah waxaa loo jeeda in caruurta isku aabe yihiin laakiin hooyooyin kala duwan kala dhalaan ''Caisha kunyadeena waxaa laoran jirey **umu**

_Cabdulaahi waxa caruur ahna rasuulkeena uma dhalin .

> Asmaa Bintu Cumays : waxay u dhashay Abiibakar **Maxamed binu abiibakar** (Asmaa waxaa horey u qabi jirey jacfar binu abii dhaalib oo ku geeriyoodeey (shahiidey) duulaankii **Mu"tah** kadib ayaa abiibakar guursadey markuu abiibakar dhinteyna waxaa guursadey **Cali binu Abii Dhaalib** ''Asmaa bintu cumeys ninkeeda Abiikar iyada dhaqdey markuu dhintey waxay ka mid ahayd dardaaranadii abiibakar uga tagay xaaskiisa Asmaa ''

> Xabiiba Bintu Khaarija: waxay u dhashay Abiibakar **Ummu_kaltuum** marka caruurta abiibakar tiradooda waa 6 (Lix) caruur 3 (Sadex) gabdho ah iyo 3 (sadex) wiilal .

> Islaamka Ka Hor Abiibakar>

Abiibakar رضي الله islaamka kahor wuxuu ahaan jirey nin ''ganacsade'' ah oo maal badan leh, Deeqsina ah oo dadka dhibaateysan ayuu caawin jirey waxa uuna safara u tagi jirey magaalooyinka allaah quraanka kusheegay (Qureysh safarkii shaam) ee ay reer makka safaro u aadi jireeen labadda xili kuleylka & Qaboowga.
Reer qureysh qofka ay aad u ixtiraamaan ayeey ahaan jireen waa sida badan wax dadka ay caado u tahay in qofka maalka haysto nasab fiican kadhashay lagu qadariyo maalka & nasabka waana caado dadka juhulada inta badan miizaanka ay wax ku miizaamaan.
>Abiibakar رضي الله waligiisa sanam uma sujuudin sida ay culimadda taariikhada ay wariyeen **axmed shaakir** kitaabkiisa wuxuuu yiri markuu abuubakar ku dhowaadey in uu qaangaaro ayaa aabihiisa wuxuu u kaxeeyey asnaamtii uu caabudi jirey markaasuu ku yiri abuu quxaafa aabe waa kuwaan ''ilaahyadeena'' Ee aan caabudno kadibna wuu ka tagay aabihiis.Abiibkar wuxuu yiri waxaan usoo dhowaadey asnaamtii waxaan ku iri waan baahanahay yacni gaajeesanahay ''cuntaa rabaa'' ee cunto isiiya iima jawaabin asnaamtii hadana waxaan ku iri waan aradanahay (dhar la"ahay) Asnaamta iima jawaabin kadib ayaan dhagax ayaan qaatey wajigaan kaga dhuftey >>

> Abiibakar رضي الله waxaa uu saaxiib la"ahaan jirey islaamka kahor Rasuulkeena رسُول الله صلى الله عليه وسلم markuu islaamka yimid waa sii xoogeysatey saaxibtinimadooda sida **umu_caisha** ay رضي الله عنها tiri " Maalin nama soo marin ilaa rasuulka Alle ayaa noo imaan (na soo booqan jirey) jirey labada galin''.

Soo Islaamadiii Abiibakar

Abiibakar رضي الله waxaa culimadda kitaab taariikha ku wariyeen in **abiibakar iyo sayd ibnu caamir ibnu nufeyl** maalin kacbadda fadhiyey ayaa waxaa soo marey **ummay a binu abii zalaat**, Markaasuu yiri sidee ku waaberiisatey kheyr doonihiyoow waxa uu ku jawaabey ''**Kheyr**" marakaasuu Beykaan tiriyey.
ayaa ''**Diin walba ayaa maalinta qiyaamaha halagsami Tii Allaah Xukmiyey Maahin**, **Nabi ayaa lasugaaya annaga** (reerbaniiisraa"il) **Mise idinka** (qureysh).

Abiibakar رضي الله waxa uu yiri maalintaas kahor maanan maqlin in nabi la sugaayo waxaan kadib aadeey **Waqata Ibnu Nowfal** oo aan sheekadii u sheegay `` kadib **waraqata** wuxuu yiri annaga ayaa kutubta ehelkeeda ah waxaa lasugaayaa Nabi waxaana laga sugaayaa carab bartankeeda xaga nasabka tolkaada ayaa laga soo saari doona abiibakroow.

Markaasaa iri adeer **:** ' nabigaas dadka muxuu ku oran doonaa? **waraqata :** wuxuu dhihi doonaa wixii loo yiri oo waxyiga ah kadib nabigaa صلى الله عليه وسلم lasoo direy kadibna waan rumeeyey.

> **Rabiica Ibnu Kacab** wuxuu yiri : Abiibakar رضي الله islaamka ka hor wuxuu safar ganacsi ku tagay shaam intuu ku jirey ayuu Riyoodey kadib wuxuu u tagay Raahibkii **buxayra** una sheegay **buxayra** wuxuu yiri abiibakarow xagee katimid ? markaas wuxuu yiri waxaan ka imid makkah wuxuu yiri buxayra mise weydiiyey cidee ayaad tahay? Markaas yiri "'Qureysh'' ahay Markaas Buxayra Yiri Maxaa qabataa ? Abiibakar ayaa yiri ""**Ganacsadde**"" ayaan ahay Markaasa Buxayra yiri hadii riyaadaada saad ii sheegatey run noqoto Inshalaah waxaa qoomkaada laga soo saari doona nabi ,Adigana wasiir ayaad u noqon doontaa Geeridiisa kadibna Khaliif ayaad noqon doontaa ,Kadib abiibakar arintaas naftiisa ayuu ku sireystey.

>Abiibakar رضي الله Marka rasuulkeeniii ka dib qof ka fadli badan majiro Abiibakar sidiiq ummada nabi maxamed isagaa ugu fadli badan ``Marka Sida Shiicada Adigoo Saxaabadda Ka fadaliyaa Yaan Lagu arkin oo Abuubakar Ka Hor Marinaayo Qofkale Ee Muslimiinta Kamidah Fadligisaa casharka danbe ayaan kaga hadli doonaa inshalaah ---->La Soco <----

- **Qaybta 2"aad** Waxay noqon doontaa ***Fadliga Abuubakar Sidiiq***

Ilaahaan Uga Mahad Celin **الحمد لله رب العالمين** Oo Ii Fududeeyey Inaan qoro **Taariikhda Khulufaa Rashidiin** oo i Waafijiyey aan Walaaladayda aan Ugu soo Gudbiyo Luuqadda Af Soomaliga Marka Waxay Khaladaad Yeelato Risaaladaan Ama Gaabinah &Luuqada Soomaliga Erayad qaarkood Aan Qeexi waayo Waxay Ka timid Nafteyda & Shaydhaan Waana Uga Toobad Keeni Allaah iyo Rasuulkeena S.c.w Bari Ayeey Kayihiin Naseexadiina Waan U Baahanahay Yaan La iga Iloobin Walaalkasto Ka Faaideysta Ama Akhristo ama Wax Kusii Daro Ilaahay (i weydiiya) iiga Barya Aniga & Labadayda Waalid & Reerkayga In Allaah na Waafijiyo Tubta Toosan & Khaatimo Toosan.

Waxaa Qorey : Walaalkiin ***Cabdiladhiif Aadan***
Akhiizubeyr_1@hotmail.com

هذا والله أعلم
لا تنسونى بالدعاء أخوكم زبير_١